**Macluumaadka bukaanka ee soo gudbinta deg-dega ah.**

## Xaashidan macluumaadka ah waxay sharaxaysaa sababta uudhaktarka ilkhaagu ama dhaktarka indhahaguuu si degdeg ah kugu gudbiyay cisbitaalka iyo waxaad u baahan tahay inaad samayso

**Maxaa si deg-deg ah la iigu soo gudbiyay cisbitaalka?**
Si degdeg ah ayaa laguu soo gudbiyay sababtoo ah dhakhtarkaaga ilkaha ama dhakhtarkaaga indhaha ayaa dareemaya in calaamadahaagu u baahan yihiin baadhitaan dheeraada si meesha looga saaro suurtogalnimada kansarka. Waxaad filan kartaa in si degdeg ah laguu arko si loo helo waxa kaa qaldan.

**Tani ma waxa ay la macna tahay in aan qabo kansar?**
Waxa jira xaalado badan oo caadi ah oo lala xidhiidhin karo calaamadan, oo uu ka mid yihay kansar. Si kastaba ha ahaatee, inta badan dadka sida degdeg ah loo gudbiyo ma qabaan kansar. Hadii ay dhacdo in kansar la ogaado, ka dibna la hubiyo in cudurka goor hore la ogaaday waxa macnaheedu tahay inay u badantahay in daawayntu noqoto mid waxtar leh. Tani waa sababta ay muhiim u tahay in si degdeg ah laguu arko.

**gudbintani waa degdeg. Waxaa lagu siin doonaa balan taleefan ahaan ah ama mid ka fool ka fool ah oo aad la kulmi doonto cisbitaalkaaga mudo 14 maalmood ah. Waxa laga yaabaa in lagaaga baahdo inaad diyaar u noqoto baadhitaano dheeraad ah afarta usbuuc ee soo socda si aad jawaabta baadhitaanada ugu hesho si degdeg ah. Fadlan hubaal ka dhig in lagu heli karo wakhtigan.**

**Muxuu u baahan yahay dhakhtaarkaaga Ilkaha ama dhakhtarkaaga indhuhu inuu ogaado?**

- Hubi in dhakhtaarkaaga ilkaha ama indhuhu uu hayo cinwaankaaga saxda ah iyo taleefan lambarkaaga oo uu ku jiro lambarka taleefanka gacantu hadii aad mid leedahay maadaama oo laga yaabo in cisbitaalku uu taleefaan ahaan kugula soo xidhiidho.
- Hadii aadan awood u lahayn in aad timaado balan labada usbuuc ee soo socda gudahood, fadlan u sheeg dhakhtaarka ilkaha ama indhaha.
- Hadii aad u baahantahay tarjumaan, qabto baahiyo helitaanka ah ama aad jeclaan lahayd la-taliye haween ah, fadla la socodsii cisbitaalka balantaada ka hor.
- Hadii aadan balan ka helin cisbitaalka laba usbuuc gudahood, fadlan la xidhiidh dhakhtarkaaga ilkaha ama indhaha ee kusoo gudbiyay. Hadii kale, hadii aad garanayso cisbitaalka laguu soo gudbiyay, waxaad la xidhiidhi kartaa waaxdooda La-talinta Bukaanka iyo Adeegyada Xidhiidhka (PALS)

**Maxaa xiga oo dhici doona?**
Cisbitaalka ayaa kula soo xidhiidhi doona si uu balan kuugu qabto. Balantaada hordhaca ee cisbitaalka ayaa noqon karta wicitaan taleefan ama muuqaal ahaan oo aad la yeelan doonto kalkaaliso takhasus leh. Kalkaalisda takhasuska leh ayaa wax badan ka ogaan doontaa calaamadahaaga. Hadii kale, waxa laga yaabaa inaad balan waji-ka-waji ah la yeelato takhasusle.

**Fadlan ogow:** *Waa inaad ogaysiisaa dhakhtarka hadii aad rabto in la duubo wicitaanka ama lagu soo daro wicitaanka saaxiib ama xubin qoyska ka mida.*

Cisbitaalku wuxuu kuusoo diri doona tilmaamaha ku saabsan balamahaaga fool-ka-foolka ah ama baadhitaanada ay suuragalka tahay in lagaa qaado maalinta aad imaanayso cisbitaalka. Fadlan si taxadar leh u hubi tilmaamahan si aad u hesho la-talinada ugu danbeeya ee ku saabsan u diyaar garawgaaga balanta.

Marka aad ogolaato taariikhdaada aad ku leedahay cisbitaalka, waxa muhiim ah inaad timaado. Fadlan wac lambarka ku qoran waraaqdaada xaqiijinta si aad cisbitaalka si degdeg ah ula socodsiiso hadii aadan wakhtiga balanta laguu qabtay imaan karin.

**Maxaa ka dhici doona cisbitaalka?**
Marka aad haysato balantaada cisbitaalka, waxaad caadi ahaan la kulmaysaa takhasusle ama lagaa qaadi karaa tijaabooyin baadhitaano ah. Hore ayaa laguugu soo sheegi doonaa hadii aad u baahan tahay wax tijaabooyin mudada balantaada, sidaa awgeed fadlan hubaal ka dhig inaad raacdo talaabo kasta oo lagu siiyay balanta ka hor. U diyaargaraw in balamahani ay qaadan karaan saacado koobaan iyadoo ay ku xidhan tahay wakhtiyada sugitaanka iyo baadhitaanada aad u baahantahay.

Waa lagu soo xidhiidhi doonaa taasoo ku saabsan natiijada ka soo baxday baadhitaanada mudo 28 maalmood ah ee soo-gudbintaada, laakiin waxa suuragal ah in natiijada baadhitaanada laguu sheego maalinta. Waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad soo wadato saaxiib ama xubin qoyska ka mida si uu kuu taageero ama hadii aad qabto walaacyo ku saabsan dhanka fahanka arimaha ay kooxda caafimaadku kaala hadli doonto adiga. Fadlan hubi warqadaada ee loogu tala galay hagitaanka soo-booqdayaasha.

**Wax su'aalo ah?**
Hadii aad qabto walaacyo ama su'aalo la xidhiidha soo-gudbintaada cisbitaalka, fadlan wac GP'gaaga qaliinka ama inaad la hadasho dhakhtarka ilkaha ama indhaha ee kusoo gudbiyay.

Hadii calaamadaaha kaa muuqda ay kasii daraan balanta ka hor ama sii jiraan ka dib markii kansarka meesha laga saaray fadlan la xidhiidh GP'gaaga.

**Liinkiyo muhiim ah oo loogu tala galay macluumaadka dheeraadka ah**

https://www.cancerresearchuk.org/
https://www.macmillan.org.uk/cancer-information-and-support

NHS

**Jadwal qiyaas ah oo loogu tala galay baadhitaanadaada iyo natiijooyinka ayaa hoos lagu qoray laakiin way ka badan karaan hadii calaamadahaagu ay yihiin kuwo adag ama aad u baahan tahay baadhitaano badan.**

**Bilawga gudbinta**

Tusaale. dhiiga, Iskaanka MRI

**Baadhitaanada**

Waxaa lagu waydiin karaa in lagaa qaado tijaabo ka hor inta aanu dhakhtarkaaga ilkaha ama indhuhu ku gudbin si ay uga caawiso go'aaminta sababaha astaamaha

**gudbinta Dhakhtarka Ilkaha/indhaha**

Dhakhtaarka ilkaha ama indhaha ayaa kuu-gudbin doona cisbitaal si loo sameeyo baadhitaano dheeraad ha ama la kulan takhasusle

**Balanta cisbitaalka 14 maalmood**

Badhiitaanada dheeraadka ah waxay noqon karaan CT ama MRI Iskaan iwm

**Baadhitaano dheeraad ah**

Waxa laga yaabaa inaad u baahato tijaaboyin dheeraad ah si ay uga caawiso takhasuslaha go'aan ka gaadhista sababha astaamaha. Fadlaan mudnaanta sii balamahan

Balantaadu waxay noqon doontaa in lagala hadlo takhasusle astaamahaaga iyo natiijooyinka. Waxaad la imaan kartaa xubin qoyska ka mida ama saaxiib

**Balanta Cisbitaalka**

Cisbitaalka ayaa ka shaqayn doona qabashada balan degdeg ah oo aad la yeelato takhasusle iyo tilmaamaha balantaada. Fadlaan mudnaanta sii balamahan

**Lagaa helay ama kansarka meesha laga saaray 28 maalmood**

**Natiijooyinka**

Cisbitaaladu way kula soo xidhiidi doonaan taasoo kuu saabsan natiijaada baadhitaanada mudo 28 maalmood ah ee soo-gudbintaada, laakiin waxa dhici karta in laguu sheego natiijada baadhitaanada maalinta

Waxa laga yaabaa inaad wali sii lahaato calaamado u baahan in la baadho iyo hadii ay kuwani sii jiraan ama ay kasii daraan waa inaad la xidhiidhaa GP'ga

**Kansarka meesha laga**

Takhasuslahaagu wuu kuusoo qori doonaa si uu kuugu sheego in jiritaanka kansarka meesha laga saaray iyo waxa xiga ee dhici doona.

**Go'aan lagu dawaynayo 31 maalmood**

Takhasuslahaaga ayaa kula soo xidhiidhi doonaa si uu kuugu sheego in kansar lagaa helay waxaanu kaala hadli doonaa daawayntaada

**Kansarka laga helay**

Kooxdaada daryeelka kansarka iyo GP'gaaga labadaba ayaa ka jawaabi doona su'aalahaaga waxa la filan karo iyo halkan aad ka helayso taageero dheeraada marka aad bilawdo daawayta

**Daawaynta koowaad 62**